Annex 1 - Police Charge Sheet

SOMALI POLICE FORCE CRIMINAL INVESTIGATION DIVITION



قوات الشرطة الصومالية قسم المباحث الجنائية

TALISKA CIIDANKA BOOLISKA SOOMAALIYEED QEYBTA BAARISTA DEMBIYADA

QBD/BD/3728/2022

Mugdisho 16 October 2022

Ku:- Maxkamadda G/Benaadir

=Muqdisho=

Og:- X. Xeer Ilaaliyaha Guud Ee Qaranka

=Muqdisho=

Ujeeddo:- Horgayn Maxkamadeed (Qod 39^{aad} XHCS), si waafaqasan amarkii hore ee Maxkamada kuna taariikhaysnaa 13 Oct 2022.

Tixraac Hogayntii sumad QBD/BD/3728/2022 ee ku taariikhaysan 13 u jeedadeenuna ahayd horgayn Maxkamadeed, codsanaayay Maxkamadda Mudo baariseed, kuna saabsanayad eedaysane Abdalla Axmed Muumin ina Aamina Ismaaciil Macalin 35 Jir ah ku dhashay Xamar degan Howlwadaag, islmarkaana ay maxkamadu amartay la soo celiyo taariikhdu marka ay tahay 16 Oct 2022, sidookalena amartay in maxkamada la horkeeno cadaymaha kala ah Muuqaalka uu baahiyay Eedaysanaha iyo Awaamirta uu jebiyay. howl wadaag, Xafiiska uu Falku Ka dhacay Goobta Eedaysanaha ---10 Oct 2022 Taariikhda uu Dhacay Falku Qodobada uu u gafay eedaysanaha -----321-219-505 XCS

Eedyasanaha waxa uu ogaal u yahay xaalada uu dalku galay ee ah dagaal ay dawladda iyo guud ahaan shacabka soomaaliyeed kula jiraan ururka Al shabaab, kaas oo uu madaxweynaha JFS ku dhawaaqay, islmarkaana ha' yadaha dawladu ka soo saareen awaamiir kala duwan

Page 1 of 4

sida, Wasaaradda warfaafinta, Wasaaradda Cadaaladda iyo arrimaha Dastuurka, Golaha wasiirdda , Xafiiska Xeer Ilaalyaha Guud ee Qaranka iyo ugu damayn wasaaraddaha Warfaafinta iyo Wasaaradda isgaarsiinta & Tignoolojiyadda, dhamaantoodna ay xambaarsanyihiin dar dargelinta dagaalka lagula jiro kooxaha nabad diidka ah ee argagixisada ah ee Al shabaab.

Awaamiirta ay soo saareen qaar ka mid ah hayadaha sare ku xusan ayaa ku saabsanaa in baraha warbaahineed ee internetka ay isticmaalaan Al shabaab ay dawladu amartay in la Xayiro, amarona ka soo saartay buunbuuninta iyo faafinta wararka borobogaanka ah ee Al Shabaab amaradaas oo uu eedaysane Abdala Axmed Mumin uu si cad uga hor yimi amaradda la siiyay ha' ayadaha bixiya Internetka, asaga oo sheegay in uu yahay mid aan sharci ahayn, waafaqsanayn dastuurka dalka, taasoo ka hor imanaysa dhamaan shuruucda dalka , asaga oo gacan borobogaan siinaynaya ururka Al shabaab oo islticmaalayay baraha la joojiyay, bah dilayana Bulshda diiday dulmiga iyo Cidanka Qaranka, islamrkaana uu sheegay asaga in ay dawladu wado jees jees , waxa uu sheegay in dagaalka lagula jiro Alshabaab uu abuuray walaac asagoon sii faah-faahin walaaca uu sababi karo in al shabaab dagaal lagu qaado.

Hadaba Maxkamadda iyo Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka waxaan u soo gudbinaynaa in taariikhdu markii ay ahayd 11 Oct 2022, waxaa la qabtay eedaysane Cabdala Axmed Mumin oo lagu tuhunsanaa Faldenbiyeed, waxaana lagu qabtay Garoonka diyaarada Muqdishu, qabashadiisan waxa loo cuskaday Qod.38 ee XHCS, madaama eedaysanaha lagu tuhunsanaa denbi ciqaabtiisa ugu badani ka badantahay 2 sano, islmarkaana uu baxsad ahaa oo safar banaanka u socday, lana helikarin amar maxkamadeed, waxaana qabashadiisa fuliyay Ciidanka Booliska garoonka iyo Nabad sugida Garoonka, waxaana loo loo gudbiyay Xarinta Nabad sugida si wax looga

Page 2 of 4

waydiiyo arimo la xariira argagixso, marka hore sidaasna loogu soo wareejiyay CID, kadib markii baaris xili kooban ah lagu samayay. Eedaysanaha waxa uu sheegay in sababta ay ugu hogaansami la'yihiin ay tahay inaan lagala tashan' ayadoo la ogyahay in arintani ay la xariirto amaro lagu sugaayo amniga aqarnka(Nationa Security Issue), lagulana dagaalmayo nabad diidka (JID IYO HIHA DIDIIDKA) sidii loogala dagaalami lahaa baraha ay isticmaalaan, kuna gudbiyaan dacaayadohooda.

Waxaan cadayn ka qornay eedaysanaha waxaana uu ku adkaysanayaa in uu saxanyahay war saxaafadeedka uu qabtay sabatuna ay tahay in aan laga tashan awaamiirta soo baxday, waxaa uu sheegay in faafinta wararka al shabaab ay fiicantahay in la joojiyo balse ay tahay in lagala tashado, sidaasana ku diidanyihiin awaamiirta Dawlada, waxa uu sheegay in ay dadkale ay la joogeen.

Eedaysane Abdalala Axmed Muumin waxa uu u gafay Qodobada xeerka Ciqaabta ee kala ah :-

Qodobka 321 XCS kaas oo nuxurkiisu yahay "Cid kasta oo si fagaara ah ugu hor kaca qof kale in uu u hogaansami waayo xeerka ku saabsan deggenaanshaha dadweynaha ama kiciya is nebcaansha dabaqadaha bulshada, waxaa lagu ciqaabayaa falkaasi galikiis xabsi seddex sano ilaa todobo sano".

Waxa uu dhiirigelinayaa dadwaynaha kuna dhiigelinayaa inaysan u hogaansamin, awaamiirta dawlada islmarkaana uu ku sheegay in ay tahay mid aan loo hogaansamin awaamiirta ka soo baxay dawlada.

Qodobka 219 XCS qodobkaas oo leh "Qof kasta oo fagaare ku xushmad dareeya Ummadda ama Qaranka ama Calanka ama Waddanka ama Astaanta Qaranka ama Hay'addaha Dastuuriga ama Ciidamada Qalabka Sida waxaa lagu ciqaabayaa Xabsi u dhexeeya lix bilood ilaa sedex sano". Eedaysanaha waxaa uu ku kacay dacaayad ka dhan ah dawlada , gaar ahaan Ciidamadda Qalabka sida oo uu uu ku sheegay inay ku

Page 3 of 4

arinkan qarinayaan gaboodfalo ay ku kacaan, ayaga oo wata Maleeshiyaad, taas oo ah dacaayad khatar ah.

Qodobka 505 XCS, Qodobkaas oo u qoran sidan "Dhawrid la'aanta Amarada Maamul Qofkasta oo ku guuldaraysta in uu dhawro amar si sharci uu u siiyey maamul guud oo danta caddaaladeed, ammaanka guud, nidaamka guud ama fayo-dhawrka ah, waxaa lagu ciqaabayaa, marka uusan falkaas ka dhalan Dembi ka culus, xarig ilaa Saddex bilood ah ama iyo ganaax 3,000 Sh. So. Ah".

Cadaymaha

- 1-Muuqaalka eedaysanahu baahiyay (Shirka Jaraa'id).
- 2- Amarka uu jebiyay ee Dawlada ka soo baxay.
- 3-Muuqaalka Dawlada lagu looga digaayo dadwaynaha in aysan faafin wararka Al Shabaab

Sidaas darteed waxaan Maxkamadda Sharafta leh ee G/Benaadir ka codsanaynaa in eedeysanaha ay ka qorto Qiraal Maxkamadeed Si Waafaqsan Qod. 68^{mad} XHCS, madaama uu yahay Qiraal, islamarkaana loo gudbiyo Xabsiga dhexe ee Xamar Si waafaqsan Qod 46 ee XCS, si aan u soo dhamaystiro baaritaanka gabagabada ee noo harsan oo ay ka dhimanyihiin in aan waraysano dadkii la joogay markuu hadlayay, kana qorno cadaymo, ayadoo aan ku soo gudbinayno si aan daahitaan macno ku fadhinin ku jiro=in sida uu qabo Qod. 26 ee XCS.

G/le C/Fitaax Cali Xersi

Taliyaha Qeybta Baarista Dembiyadda CID

Page 4 of 4

Annex 2 – First Bail Order

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA IAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR XAFIISKA GUDOOMIYAHA



جمهوریه الصومال العدرالیه محکمة محافظة بنادر مکتب الرئیس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA BANADIR REGIONAL COURT OFFICE OF THE CHAIRMAN

SUM: MGB/DDL/1018/2022

Ku: Taliyaha Qeybta Baarista Dambiyada CID

Og: Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud Ee Qaranka

Tr: 16/10/2022

=Mugdisho=

=Muqdisho=

UJEEDDO: Amar Damaanad ku siidayn KU SIMAHA GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/BANAADIR

Markii uu arkay:

Galka Sumadiisu tahay MGB/DDL/1018/2022 oo uu

eedaysane ka yahay:

1. Cabdalla Axmed Muumin ina Aamina Ismaaciil

Macalin 35 jir ah, ku dhashay Xamar Dagan

Howlwadaag kuna eedaysan Qodobada 321,219,505

XCS, Lana soo xiray 12/10/2022.

Markii uu arkay:

Warqadda ku taariikheysan 16/10/2022, Ujeedadeeduna

tahay Codsi Damaanad ayna soo qorteen Maxamed

Cabduwahaab Cabdulaahi iyo Hanad Cali Guuleed.

Markii uu Arkay:

Qod. 59-60- XHCS.

Markii uu tixgeliyay:

Danta Guud ee Cadaaladda.

GO'AANKA MAXKAMADDA

Sidaas Darteed, Waxa la farayaa Taliyaha Qeybta Baarista Dambiyada CID ee warqadaani sida tooska ah ugu socoto in aad damaanad kusii deysid Eedeysane Cabdalla Axmed Muumin ina Aamina Ismaaciil Macalin 35 jir ah, ku dhashay Xamar Dagan Howlwadaag kuna eedeysan Qodobada 321,219,505,XCS lana soo xiray 12/10/2022.

F.G: Sidoo kale Damiintayaasha waxaa la farayaa in ay keenaan eedaysanaha haddii looga baahdo Maxkamadda.

Fulin Wacan

CABDIRAXMAAN SACIID AXMED

KU SIMAHA GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/BANAADIR

Email: maxkamadda.gb@gmail.com , Publice ation@mgb.gov.so

Tell: +252 618060934/+252614490884

Address : HQ Office, H. Weyne District, London Road , Mogadishu, Somalia.

Annex 3 – Revocation of Bail Order & Warrant

FEBERAALKA SOOMAALIYA XKAMADDA GOBOLKA BANAADIR XAFIISKA GUDOOMIYAHA



محكمة محافظة بنادر مكتب الرنيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA BANADIR REGIONAL COURT OFFICE OF THE CHAIRMAN

SUM: MGB/ DDL /1018 /2022

Ku: Taliyaha Qeybta Baarista Dambiyada CID

OG: Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud ee Qaranka

Tr: 19 /10/2022.

=Muqdisho=

= Muqdisho=

UJEEDDO: AMAR DAMAANAD KA LAABASHO & AMAR SOO QABASHO KU SIMAHA GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/BANAADIR

Markuu Arkay:

Warqadda sumadeedu tahay QBD/BD/3728/2022 kuna taariikhaysan 16/10/2022 u jeedadeeduna ahayd Horgayn Maxkamadeed, kana soo baxday Qeybta Baarista Dambiyada CID, laguna horkeenay Maxkamadda G/banaadir eedaysane Cabdalla Axmed Muumin ina Aamina Ismaaciil Macalin 35 jir ah, ku dhashay Xamar Dagan Howlwadaag kuna eedaysan Qodobada 321,219,505 XCS, Lana soo xiray 12/10/2022.

Markuu Arkay:

Galka sumadiisu tahay MGB/DDL/1018/2022 oo uu eedaysane ka yahay Cabdalla Axmed Muumin ina Aamina Ismaaciil Macalin 35 jir ah, ku dhashay Xamar Dagan Howlwadaag kuna eedaysan Qodobada 321,219,505 XCS, Lana soo xiray 12/10/2022.

Markuu Arkay:

Warqada sumadeedu tahay MGB/DDL/1018/2022 Kuna Taariikhaysan 16/10/2022, Ujeedadeeduna ahayd in si ku meel gaar ah loogu hayo eedeysanaha Xabsiga, Kana Soo baxday Maxkmadda Gobolka Banaadir.

Markii uu arkay:

Warqadda ku taariikheysan 16/10/2022, Ujeedadeeduna ahayd Codsi Damaanad ayna soo qorteen Maxamed Cabduwahaab Cabdulaahi iyo Hanad Cali Guuleed, iyagoo sheegay in ay damiinul nafsi ka yihiin eedaysanaha sare ku xusan balana qaadeen in ay Maxkamadda keeni doonaan xiligii loo baahdo.

Email: maxkamadda.gb@gmail.com , Publicrelation@mgb.gov.so Tell: +252 618060934/+252614490884

Address :HQ Office, H.Weyne District, London Road , Mogadishu, Somalia.

.vlarkuu Arkay:

Warqada sumadeedu tahay MGB/DDL/1018/2022 Kuna 16/10/2022, Ujeedadeeduna Tahay, Taariikhaysan Damaanad Ku Siideyn, Kana Soo baxday Maxkmadda Gobolka Banaadir.

Markuu Arkay:

Qod 63aad Faqaradiisa 1 aad Xarafkiisa (T) ee XHCS oo nuxurkiisu yahay in isku dayga ka bixida tahay sabab keena damaanad la noqoshada, iyadoo eedaysanuhu uu jabiyay damaanadii ay Maxkamadda siisay lana soo qabtay isagoo ka dhoofaayo Garoonka Diyaaradaha Caalamiga Ah Ee Aadan Cadde.

Markuu Arkay:

Qod. 60(1)-63(1)(T) ee XHCS

GO'AANKA MAXKAMADDA:

- 1. Waxay baabi'isay damaanadii uu banaanka ku joogay eedaysane Cabdalla Axmed Muumin si waafaqsan Qod.63(1)(T XHCS, maadaama uu jabiyay shuruudihii
 - 2. Waxaa lafarayaa Taliyaha Qeybta Baarista Dambiyada CID inaad xabsiga si kumeel gaar ah ugu haysaan eedaysane Cabdalla Axmed Muumin, si waafaqsan Qod.46 XHCS.
 - 3. Go'aankaan waxaa la gaaray maanta oo ay taariikhdu tahay 19/10/2022.
 - 4. Waxaa ka furan Racfaan mudada Sharciga Ogal yahay.

Fulin Wacan

CABDIRAXMAAN SACIRD AXMED

KU SIMAHA GUDDOOMIYAHA MAXKAMADIDA GZBANAADIR

Email: maxkamadda.gb@gmail.com , Publicrelation@mgb.gov.so Tell: +252 618060934/+252614490884

Address : HQ Office, H. Weyne District, London Road , Mogadishu, Somalia.

Annex 4 – Second Bail Order

JAMHOURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA MAXKAMADDA RAFCAANKA

GOBOLKA BANAADIR



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA Banaadir Regional Appeal Court

Sum: MRGB/69/2022-BG

Tr: 22/10/2022

Ku: Taliyaha Qeybta Baarista Dambiyada C.I.D.

=Mugdisho=

Og: Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

=Muqdisho=

Uzerddo: AMAR DAMAANAD KU SII DEYN MAXBUUS

Crafdeonnyaha Maxkamadda Kafetania G. Banadas

Markun Arkay:

Gal-dacwadeedka lambarkiisu yahay MRGB/69/2022-BG, u

dhaxeeya dhinacyada kala ah:

I. Cabdalla Axmed Muumin ina Aamino Ismaaciil Macalin 35-jir ah ku dhashay Xamar deggan Degmada Howl-wadaag, kuna Eedeysan Qodobada kala ah:- 321-219-505 XCS Qareena ah Avv. Daahir Maxamed Cali, Avv. Cabdinaasir Xuseen Daahir Rafcaanle iyo C/raxmaan Xasan Cumar_

LID KU AH

2. Xafuska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka...... (Rafcaansane)

Markuu Arkay:

Warqadda Summadeedu tahay 00375/2022 kuna tr. 20/10/

2022 Ujeedadeeduna tahay Wakaalad Qareenimo.

Markuu Arkay:

Codsiga Damaanada Ee ku tr.22/11/2022 una soo gorteen

Maxkamadda Rafcaanka G/Banaadir Maxamed Cabdiwahaab

Cabdullaahi iyo Hanad Cali Guuleed.

Markuu Arkay:

Warqadda Summadeedu tahay HL/31/2022 Ujeedadeeduna tahay

Rafcaan lid ku ah Amar Damaanad kala Noqosho Summadiisu

tahay MGB/DDL/1018/2022 kuna tr.19/10/2022.

Markuu Arkay:

Warqadda Summadusu tahay MGB/DDL/1018/2022 kuna tr. 19/10/2022 Ujeedadeeduna tahay Amar Damaanad kala laabasho

iyo Amar Soo Qabasho kuna soo baxday Maxkamadda G/Banaair.

Email:banadirappealcourt@gmail.com

Tell: +252613666662

Address :HQ Office, H.Weyne District, London Road ,Mogadishu, Somalia

Markuu Arkay:

Warqadda Summadusu tahay MGB/DDL/1018/2022 kuna tr.

16/10/2022 Ujeedadeeduna tahay Amar Damaanad ku Sii Deyn

kuna soo baxday Maxkamadda G/Banaadir.

Markuu Arkay:

Qodobada kala ah:- 321-219-505 XCS.

Markuu Arkay:

Qodobada kala ah:- 59-60-61-XHCS

Markuu Arkay:

Danta Guud Ee Caddaalada.

GO'AANKA MAXKAMADDA

Haddaba, Taliyaha Qeybta Baarista Dambiyada C.I.D waxaa la farayaa in uu xabsiga ka sii daayo Eedeysane:- Cabdalla Axmed Muumin ina Aamino Ismaacul Macalin 35-jir ah ku dhashay Xamar deggan Degmada Howl-wadaag, kuna Eedeysan Qodobada kala ah:- 321-219-505 XCS, maadaama Maxkamadda ay siisay damaanad si waafaqsan qodobada sare ku xusan.

Sidoo Kale Maxkamaddu waxay fareysaa Eedeysanaha:-

Lin uusan warbaahinta ka hadli Karin uu kiiskiisa ka dhamaanaayo.

In uusan Dalka ka bixi Karin inta ay Maxkamaddu Go'aanka ka soo saareyso kiiska loo heysto Eedeysanaha.

♣ Go'aankaan Wxaaa la gaaray Maanta oo ay taariikhdu tahay 22/10/2022.

 ♣ Waxaa ka ka furan Rafeaan mudada Shareiga ogol yahay.

F.G. Wxaaa la farayaa Damiintayaasha in ay keenaan Eedeysanaha haddii looga baahdo Maxkamadda.

Fulin Wacan

Dr. Maxamed Axmed Cusmaan "Baarri" 22 -Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka G/Banaadir

Email:banadirappealcourt@gmail.com Tell: +252613666662
Address :HQ Office, H.Weyne District, London Road ,Mogadishu, Somalia

Annex 5 – Summons from Banadir Regional Court

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR XAFIISKA GUDOOMIYAHA



جمهورية الصومال الفدرالية محكمة محافظة بنادر مكتب الرنيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA BANADIR REGIONAL COURT OFFICE OF THE CHAIRPERSON

QEYBTA CIQAABTA

Tr: 28/11/2022 SUM: MGB/DDL/1018/2022 =Muqdisho= Ku: Taliyaha Qeybta Baarista Dambiyada CID Ku: Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud Ee Qaranka =Muqdisho= =Muqdisho= Ku: Qareennada Eedaysanaha =Muqdisho= Ku: Damiinte Maxamed Cabdiwahaab Cabdullaahi =Muqdisho= Ku: Damiinte Hanad Cali Guuleed

UJEEDDO: MUDDEYN DACWO

Banaadir Gal-dacwadeedka Maxkamadda Waxay Muddeysay Gobolka Sumaddiisu tahay MGB/DDL/1018/2022. oo eedaysane uu ka yahay:

Cabdalla Axmed Muumin ina Aamina Ismaaciil Macallin 35 jir ah ku dhashay Xamar deggan Hawl-wadaag, kuna eedeysan Qodobada 321, 219 iyo 505 XCS. Lana xiray 12/10/2022, Kuna deysan damaanad ay damiinteen Maxamed Cabdiwahaab Cabdullaahi iyo Hanad Cali Guuleed.

Maxkamaddu iyada oo gudanaysa waajibka saaran ee ku xusan Qodobada 75, 80 XHCS, waxey:

- 1- Faraysaa Damiintayaasha kor ku xusan in ay hor keenaan Maxkamadda eedaysanaha ay damiinka ka yihiin maalinta Arbacada taariikhduna tahay 04/01/2023 saacadduna tahay 11.00 subaxnimo.
- 2- Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud waxa lala socodsiinayaa in ay ka soo qeyb galaan dhageysiga dacwaddan isla taariikhda kor ku xusan.
- 3- Sidoo kale qareennada difaaca eedeysanaha waxa lala socodsiinayaa in ay ka soo qeyb galaan dacwadda si ay u difaacaan eedaysanaha.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR ANDOR GOBOLKS

Garyaqaan Saalax Qali Maxamuud MMMMMM

Email: maxkamadda.gb@gmail.com, Publicrelation@mgb.gov.

Tell: +252 618060934/+252614490884

OF PETA CTOAL Address : HQ Office, H.Weyne District, London Road , Mogadishu, Somalia.

